Oregon Health Authority

QAYBTA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA

Su’aalaha Inta Badan La Iska Weydiiyo Tallaalada COVID-19 ee loogu talagalay 5-11 Sanno Jirrada

(La Cusbooneysiiyay 11-03-2021)

S: Tallaalkee ayaa loo oggolaaday 5-11 sanno jirrada?

Nooca carruurta ee tallaalka COVID-19 ee Pfizer ayaa loo oggolaaday dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 11 jir.

S: Nooca carruurta ma tahay laba garoojo oo isxigxigta?

Haa. Tallaalka carruurta waa in loo bixiyaa laba qiyaasood ahaan oo hore oo isxigxigta, oo ay u dhaxayso 3 toddobaad.

S: Waa maxay farqiga u dhexeeya garoojada qofka weyn iyo garoojada carruurta ee Pfizer?

Garoojada carruurta waa 1/3^{aad} garoojada loogu talagalay dadka da'doodu tahay 12 jir iyo ka weyn. Garoojada 12 jirka iyo ka weyn waa 30 maykarogaraam oo tallaal ah. Garoojada carruurta waa 10 maykarogaraam.

Farqiga u dhexeeya garoojada dadka weyn iyo garoojada carruurta ee COVID-19 ee tallaalka Pfizer		
	Da'da 12 jirka iyo ka weyn	**Da'da 5 jirka ilaa <12**
Midabka furka dhalada daawada	Carwaajis	Oranji
Garoojada	30 maykarogaraam	10 maykarogaraam
Garoojada ku jirta dhalo walba kadib qasida	6	10

S: Xalka qofka weyn ma loo isticmaali karaa in lagu tallaalo carruurta 5-12 jirka ah?

Maya. Bixiyeyaashu waa inay isticmaalaan xalka carruurta ee da'doodu tahay 5 ilaa 11. Tallaalka carruurta waxa kale oo uu la socdaa xirmada siyaadada ah ee carruurta.

S: Halkee carruurta ka heli karaan tallaalka?

Qoondada bilawga ah ee gobolka ee tallaalka carruurta ee Pfizer ayaa la bilaabay in loo soo raro Oregon isbuucan wayna sii socon doontaa. Dhawrka toddobaad ee soo socda, farmashiyeyaasha, xarumaha caafimaadka u-qalma ee dawladda dhexe, xafiisyada dhakhaatiirta, iyo xarumaha gaarka ah ee tallaalka COVID-19 ayaa la diyaarin doonaa si loogu tallaalo carruurta. Wac bixiyahaaga ama isticmaal Get Vaccinated Oregon Khariidadda goobta tallaalka si aad u hesho bixiye kuu dhow oo haya garoojooyinka carruurta ee Pfizer. Waxaad sidoo kale wici kartaa 211.

S: Miyay farmashiyeyaashu tallaali karaan carruurta ka yar 12 jir?

Agaasimaha Caafimaadka Guud ee gobolka ayaa soo saaray amar u oggolaanaya farmashiisteyaasha Oregon inay ku duraan tallaallada COVID-19 iyo tallaallada hargabka, carruurta ka yar 3 jir. (Tallaalka COVID-19 hadda waxaa loo oggolaaday carruurta 5 jirka ah iyo ka weyn). Farmashiyeyaasha aqbala bukaannada ku jira Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) magdhow ayaa la siin doonaa si ay uga tallaalaan carruurta ka yar 3 hargabka iyo ilaa da'da 5 jirka uga tallaalaan COVID-19.

S: Waa maxay waxdhimaalada la ogyahay?

Waxdhimaalada la ogyahay waxay la mid yihiin kuwa dhalinyarada iyo dadka waaweyn: guud ahaan xanuunida goobta la isku duro, daal, madax-xanuun, iyo murqo-xanuun. Waxdhimaalada naadirka ah sida bararka muruqaha wadnaha laguma arag tijaabooyinka horseeday oggolaanshaha, waxaana la filayaa inay naadir noqdaan, maadaama ay ku dhacaan kooxaha da'aada weyn.

S: Ka waran barbardhiga tallaalka hargabka marka loo eego waxtarka?

Labada tallaalba aad ayay waxtar ugu leeyihiin ka ilaalinta inay jirradaan carruurta. Tallaalka COVID-19 wuxuu dhaliyay falcelin adag oo jeermis la deris waxaana la ogaaday in 90.7% waxtar u leeyahay kahortagga COVID-19 ee carruurta da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 11. Tallaalka hargabka sannad kasta wuu isbeddelaa si uu ula jaanqaado fayrasyada hargabka ee la filayo inay dhashaan. Waxtarka uu u leeyahay dadweynaha waxaa lagu qiyaasaa 40% ilaa 60%. Sida laga soo xigtay CDC, Daraasad 2014 la sameeyay ayaa muujisay in tallaalka hargabka uu hoos u dhigay halista carruurta ugu jiraan dhigista qaybta daryeelka degdegga ah ee hargabka ilaa 74% iyadoo lagu saleynayo xogta 2010-2012. Daraasad 2017 la sameeyay oo lagu daabacay joornaalka Caafimaadka Carruurta ayaa muujisay in tallaalka hargabka uu hoos u dhigay halista u dhimashada hargabka 51% ee carruurta leh xaalado caafimaad oo hoose, khatarta sare leh iyo ku dhawaad saddex-meelood laba meel (boqolkiiba 65) carruurta caafimaadka qabta.

S: Sidee ayuu tallaalka COVID-19 u saameeya carruurta qabta xaalado horay u jiray?

Bixiyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qiimeeyaan dhacdooyinka gaarka ah ee kiiska caafimaad ee loogu talagalay carruurta qabtay xaalado horay u jiray oo ay ku jiraan taariikh hore ee bararka murqaha wadnaha ama cilladda bararka nidaamyada badan (MIS-C). Tixgelinada CDC ee khuseeya isticmaalka tallaalka ee kooxahaan waxaa laga heli karaa halkan.

S: Ma jiraan waxdhimaalada muddada-dheer ee ka yimaada tallaalka?

Xogta laga helay tallaalida dhallinyarada ma muujin halis weyn oo waxdhimaalada muddada-dheer ah. Dhab ahaantii dhammaan waxdhimaalada ka dhashay tallaallada waxay ku dhacaan dhowr maalmood gudahooda iyo ugu badnaan lix toddobaad kadib tallaalka. Ma jiraan carruur qabtay bararka murqaha wadnaha oo u dhintay waxdhimaaladan naadirka ah.

S: Maxay ka dhigan tahay in xaalad degdeg ah loo oggolaado tallaalka beddelka oggolaanshaha FDA?

Oggolaanshaha degdega ah waa hab ay FDA ku qaadi karto tallaabooyin kahortag ama daaweyno kale oo loo heli karo si dhakhso leh marka la barbardhigo nidaamka caadiga ah ee ujeeddadiisu tahay ka jawaabida xaaladda degdega ah ee caafimaadka dadweynaha. Habkan ayaa la isticmaalayay ilaa 2001 iyadoo la oggolaaday tallaalka Kudka.

S: Maxay tahay sababta aan halis ugu gelinayo ilmahayga tallaalka haddii dhacdooyinka COVID-19 ee carruurta ay aad u yar yihiin?

COVID-19 wuxuu noqday mid ka mid ah tobanka sababood ee ugu sarreeya ee keena dhimashada carruurta. Tallaalida waxay ka ilaaliyaan ilmaha jirrada daran, isbitaal dhigida iyo dhimashada ka dhalata COVID-19. Gudaha Maraykanka laga bilaabo Oktoobar 17, 2021, 1.9 milyan oo kiisas oo COVID-19, 8,300 isbitaal dhigid oo la xiriirta, 2,316 kiisas oo Cillada Bararka ee Nidaamyada Badan ee Carruurta (MIS-C), iyo 94 dhimasho oo la xiriirta COVID-19 ayaa laga soo sheegay carruurta 5 ilaa 11 sanno jirka ah. Gudaha Oregon dhammaadka Oktoobar 31, 2021, 26,370 kiisas, 240 isbitaal dhigid, iyo 2 dhimasho oo COVID-19 sababay ayaa la soo sheegay

S: Immisa carruur oo 5-11 jir ah ayaa ku lug lahaa tijaabooyinka?

CDC waxay ku warrantay in badqabka tallaalka carruurta ee COVID-19 ee Pfizer laga darsay ku dhawaad 3,100 carruur ah oo da'doodu u dhaxayso 5 ilaa 11, mana jirin waxdhimaalo tallaal oo halis ah oo lagu arkay daraasadda socota. Ilaa hadda gudaha Maraykanka, qiyaastii 57% dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 12-15 iyo 64% ee da'doodu u dhaxayso 16-17 ayaa lagu tallaalay nooca dadka waaweyn ee COVID-19ee Pfizer.

S: Waa maxay halista tallaal ee lala xiriirinayo bararka murqaha wadnaha ee 5-11 sanno jirrada?

Halista tallaalka ee lala xiriirinayo bararka murqaha wadnaha ee da'-kooxeedkan ayaa loo maleynayaa inay ka hooseyso halista lagu sheegay da'-kooxeedyada waaweyn. Kooxda halista ugu badan ee tallaal ee lala xiriirinayo bararka murqaha wadnaha ayaa ahaa ragga qaatay garoojada 2-^{aad} ee 16-17 sanno jirka ah, taasoo ahayd qiyaastii 1 kiis oo ka mid ah 14,500 qofba. Halista ayaa ku yarayd ragga da'aada kale ah, waxayna aad uga yarayd dheddigga. Halista in bararka murqaha wadnaha laga qaado cudurka COVID-19 ayaa aad u sareysay.

S: Miyay tahay in ilmahaygu la tallaalo hadduu horay u qaabay COVID-19?

Haa. Difaaca jirka ee dabiiciga ah wuxuu bixiyaa xoogaa difaac ah balse ma ahan difaac dhammaystiran, waxaana sii socda ku faafitaanka COVID-19 ee da'-kooxeedkan iyadoo ay jirto tirada badan ee carruurta ee horay ugu dhacay cudurka; Tallaalka COVID-19 wuxuu bixiyaa difaac dheeraad ah oo la xaqiijiyay.

S: Ilmahaygu isku mar ma qaadan karaa tallaalka hargabka iyo tallaalka COVID?

Haa. Ka tallaalida labada cudurba waa muhiim, oo isla qaadashada tallaalada guud ahaan ma keenin waxdhimaalo badan ama difaac-yari.

S: Ma jiraan saameyno mustaqbalka fog ah ay carruurtu u leeyihiin qaadashada tallaalka? Tallaaladu ma beddeli doonaan DNA-ga ama ma saameyn doonaan xubnaha taranka?

Tallaaladu ma saameeyaan DNA-ga. Xogta tallaalka COVID-19 ee haween badan, oo ay ku jiraan haweenka uurka leh, ayaan muujinin saameyn dhalmo ama suurtagalnimada dhicinta.

S: Ma la heli doonaa tallaalka carruurta?

Oregon waxaa la filayaa inay hesho tallaal ku filan oo lagu tallaalo 5 ilaa 11 sanno jirka ku nool gobolka. Tallaalka caruurtu wuxuu u iman doonaa dufcooyin, iyadoo dufcada ugu horraysa imanayaan bisha Noofeembar 1 xarumaha caafimaadka ee dawladda dhexe ee u-qalma, maamulka caafimaadka dadweynaha ee degaanka iyo farmashiyeyaasha. Waxaan bixinaynaa qoondooyinka aan ka helno dawladda dhexe si aan u hubino bixiyeyaasha inay helaan tirada loo baahan yahay si ay u siiyaan garoojooyinka koowaad iyo labaad bukaanadooda.

S: Miyay dugsiyadu uga baahan doonaan ardayda inay tallaalnaadaan/haystaan ka-dhaafitaanka COVID-19? Ka warran marka si buuxda loo oggolaado?

Uga baahashada tallaalka COVID-19 ardayda waa go'aan u yaalo degmo-dugsiyeedka, oo ka duwan waxa OHA laga yaabo inay uga baahan tahay ama ku kula taliso gobolka oo dhan.

S: Dhakhaatiirta carruurtu ma qaadan doonaan tallaalka?

Haa, waxaanu si firfircoon ugala shaqaynaynaa dhakhaatiirta carruurta oo in kale oo badan, haddaysan ahayn inta ugu badan, ayaa heli doonaan tallaalka, lagana yaabo inuu bilawdo toddobaadka 8-da Noofeembar.

S: Farmashiyeyaashu ma awoodi doonaan inay siiyaan tallaalada da'-kooxeedkan?

Farmashiyeyaashu hadda waxay awoodaan inay ku tallaalaan carruurta da'doodu tahay 3 jir ama ka weyn tallaalka hargabka iyo kuwa da'doodu tahay 5 jir iyo ka weyn tallaalka COVID-19. Khariidada Goobta tallaalka ee ku jirta Get Vaccinated Oregon (GVO) waxaa ka mid ah farmashiyeyaal haya garoojada daawada carruurta ee tallaalka (garoojada qaangaarka ee dadka da'doodu tahay 12 jir iyo ka weyn looma isticmaali karo carruurta ka yar 12 jir). Waxaad awoodi doontaa inaad ka raadiso tallaalka Pfizer ee carruurta ee qaybta shaandheeyeyaasha ee GVO ee ku jirta qaybta 'Noocyada Talaalka'.

S: Ma ognahay in garoojooyinka xoojinta loo baahan doono in la siiyo 5 ilaa 11 sanno jirrada?

Ma ahan waqtigan. CDC waxay sii wadi doontaa inay dib-u-eegto xogta markay diyaar noqoto.

S: Waalidka/mas'uulka ma loo baahan yahay inuu joogo ama qof kale oo weyn (sida walaal 18 jir ah ama awoowe/ayeeyo) ma soo raaci karaan ilmaha aan qaangaarin?

Gudaha Oregon, carruurta ka weyn da'da 15 waxaa loo oggolyahay inay bixiyaan ogolaanshaha adeegyada caafimaadka. Carruurta ka yar da'dan waxay u baahan doonaan oggolaanshaha waalidka ama mas'uulka.

S: Ma lagu samayn doonaa isbdedel Dugsiyo Diyaar ah, Arday Nabdoon?

Cusbooneysiin ayaa lagu sameyn doonaa Qaabdhismeedka Adkeysiga ee RSSL marka OHA ay hirgelinayso hagista iyo taageerooyinka cusub. Tani waa hawl socota waana si la mid ah dhammaan isbeddellada saameeya ardayda iyo shaqaalaha.

S: Ma ku dari karaa ilmahayga fasal "la tallaalay"?

Ikhtiyaarkan waxay u badan tahay inaan loo heli doonin waalidiinta iyo ardayda.

S: Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu noqdo 12 sanno jir inta u dhaxaysa garoojooyinka koowaad iyo labaad?

Markan oo kale, mid ka mid ah tallaalka carruurta ama xalka qofka weyn ayaa laga yaabaa in laga siiyo labada garoojo.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir COVID-19 Communications Unit lambarka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us.